

## **Jadwalka aayar u qaadista xayiraadaha**

### **Isbeddelada soo socda waxaa dhaqan gal ahaan la bilaabayaa laga bilaabo 7 Maayo.**

- Cabbirka kooxaha lagu taliyay goobta gaarka ah waxay kordhi doontaa laga bilaabo inta ugu badan ee 20 qof ah, haddii uu qof kastaa awoodo inuu u jiro ugu yaraan hal mitir ka kale.
- Tani sidoo kale waxay la macno tahay in layliska iyo ciyaaraha kale ee abaabulan ay dhici doonaan iyagoo ku lug leh ilaa 20 qof haddii ay isku jirsadaan ugu yaraan hal mitir. Aagan, waa Waaxda Caafimaadka talooyinkeeda iyo ciyaaraha hagitaanadooda ee ku habboon. Tallooyinka iyo tilmaamahan waa in la raaco.
- Xarumaha ciyaaraha dib ayay u furmayaan. Waxaa jirta mamnuucida isticmaalka qolalka beddelashada xaga xarumaha ciyaaraha.
- Dhacdooyinka ilaa 50 ka qayb gala waxaa loo oggolaan doontaa meelaha dad waynaha, ka qayb galayaasha la siiyo waxay awoodaan inay joogaan ugu yaraan hal mitir meel ka durugsan oo waxaa jira abaabule masuul ah. Tan waxaa loo adeegsadaa dhammaan noocyada dhacdooyinka, ay ku jirto dhacdooyinka ciyaaraha sida tartamada, tartamada koobka iyo ciyaaraha tartarka ah. Shaqaalaha iyo qandaraaslayaasha waxay ka masuul yihiin maaraynta dhacdooyinka gudaha meelaha dad waynaha loogama fekeri doono qayb dhacdada ah. Doorokooda waa in la dhigo heerarka gaarka ah ee warshadda.
- Mamnuucida safarka caalamiga ah ee xirfad yaqaanada waa la qaaday. Si kastaba ha ahaatee, safarka caalamiga weli waa in la iska ilaaliyaa halka ay suuragalka tahay. Qof kasta oo dalka dibada kaga maqnaa waa in la karantiimeeyo marka uu ku soo noqdo Norway.
- Dad waynaha waa in loo diyaariyo karantiimada safarka si ay u sii wadaan xagaaga oo dhan.
- Muddada karantiimada la gelinayo waxaa lagu yareeyay laga bilaabo 14 maalmood ilaa 10 maalmood. Qof kasta oo si dhow u taabtay qof la xaqiijiyay inuu qabay ilaa 48 saacadood ka hor inta aanay ku dhicin astaantooda u horaysa waa in ay karantiimada galaan. Dadku waa inay karantiimada weli ku jiraan haddii ay u jirsadeen labba mitir qof cudurka qaba wax ka badan 15 daqiiqo. Ka reebid lix bilood ah waajibka in la galo karantiimo waxaa la siiyaa qof kasta kaas oo uu hadda ka hor ku dhacay SARS-CoV-2.
- Loo shaqeeyayaasha waa inay hubiyaan in dhammaan shaqaalahu ay awoodaan inay joogaan ugu yaraan hal mitir meel u jirto dhammaan maalintooda shaqada oo dhan. Aagaga wadanka halka shaqaalahu ay ku tiirsan yihiin gaadiidka dad waynaha, loo shaqeeyayaasha waxaa lagu dhiirigelinayaa inay fududeeyaan shaqada xafiiska guriga iyo/ama kullanka internatka ah meel kasta oo ay suuragal tahay, iyaddoo caadi loo joogo goobta shaqada keliya marka ay lama huraan tahay. Tani gaar ahaan waxay ku habboon tahay gudaha aaga Oslo iyo magaalooyinka kale iyo magaalooyinka halka uu jiro cadaadiska gaadiidka dad waynaha.

## **Isbeddelada soo socda waxaa la bilaabi doonaa si dhaqan gal ah laga bilaabo 11 Maayo.**

- Dhammaan dugsiyada hoose iyo sare waxaa dib loo furi doonaa dhammaan kooxaha sanadka muddada todobaadka ka bilaabmaya 11 Maayo 2020 (jadwalka todobaadka 20) Sharciyada xakamaynta caabuqa waa in la raacaa, taas oo la macno ahaan karti inaanay dhammaan ardaydu joogayn gudaha dugsiya isku wakhti.
- Waxbarashadda Dadka waa wayn iyo barnaamijyada tababarka ee qaxootiga hoosta Xeerka Bilaabida sidoo kale dib ayay u furmayaan muddo todobaadka 20.
- Dugsiya sare ee Folk (Folkehøgskoler) waa inuu xidhnaadaa dhammaan sanad tacliimeedka, marka laga reebo koorsooyinka gaagaaban.
- Dugsiyada wadista dib yaa loo furi karaa. Waa inay u hogaansamaan shuruudaha xakamaynta caabuqa ku habboon ganacsiyad akale ee taabashada mid ilaa mid ah.
- Waa ujeedada lagu awood siiyo hoolalka bingo iyo dhismayaasha la midka ah inay dib u furmaan.
- Jaamacadaha, kulliyadaha jaamacada iyo kulliyadaha farsamada waa inay sii wadaan inay bixiyaan waxbarashadda fogaanta. Ardayda looga baahan yahay inay joogaan goobta waxbarasho si ay u sii wadaana socodka waxbarashada waxay awood u yeelan doonaa inay gaadhaan goobtooda waxbarasho. Machadyada waxbarashaddu waa inay raacaan shuruudaha ku habboon ee ku saabsan xakamaynta caabuqa.
- Koorsooyinka ay wado ururka waxbarashadda dadka waa wayn ama Kompetansepluss waa inay sii socotaa si loo siiyo waxbarashadda fogaanta. Ardayda looga baahan yahay inay joogaan goobta waxbarasho si ay u sii wadaana socodka waxbarashada waxay awood u yeelan doonaa inay gaadhaan goobtooda waxbarasho. Machadyada waxbarashaddu waa inay raacaan shuruudaha ku habboon ee ku saabsan xakamaynta caabuqa.
- Hagaha ciyaaraha ayaa la daabacayaa, iyaddoo la adkaynayo caruurta iyo ciyaaraha dhalinta kuwa ku lugta leh taabashada jidhka, sida kubbada cagta. Ujeedada waa in awood loo siiyo carruurta iyo dhalin yarada inay ka qayb galaan ciyaaraha qaab kaas oo aad u caadisan iminka, tusaale, tartamada ciyaaraha ku lidka ah ciyaaryahanada kale ee ku jira kooxdooda. Tani waa inay ku dhacdaa qaab badbaado ah marka la eego iska ilaalinta caabuqa.

## **Qorshayaasha la samaynayo si loo hirgeliyo isbeddelada soo socda si dhaqan gal ah laga bilaabo 1 Juun:**

- Makhaayadaha bunka iyo baararka aan adeegin cunto waxay awoodi doonaan inay dib u furmaan, haddii ay awoodaan inay raacaan sharciga kala fogaanshaha bulshadda ugu yaraan hal mitir. Shuruudaha khuseeya fadhiga iyo adeega miiska waxaa loo dhig doonaa si waafaqsan sharciga.
- Beeraha lagu nasto dib ayuu
- Dabaasha abaabulan, ay ku jiraan dabaasha dugsiya, waa la oggolaan doonaa.

- Waaxda Caafimaadka iyo Machadka Qaranka ee Caafimaadka Dad waynaha waxay baahin doonaa talada dib loo eegay ee safarka raaxaysiga ah wakhti aan ka damabayn 15 Maayo. Taladan waxay haboontahay laga bilaabo 1 Juun.

**Qorshayaasha la samaynayo si loo bilaabo isbeddelada soo socda si dhaqan gal ah laga bilaabo 15 Juun:**

- Dhacdooyinka ilaa 200 oo qof ayaa la oggolaan doonaa.
- Waa ujeedada in la oggolaado jiiinka in dib loo furo, haddii masuuliyiinta caafimaadku ay aqbalaan tallaabooyinka xakamaynta caabuqa ee habboon ee warshadda.
- Waa ujeedada in la oggolaado beeraha lagu nasto ee biyaha iyo berkadaha dabaashu guud ahaan in dib loogu furo dad waynaha haddii masuuliyiinta caafimaadka ay aqbalaan tallaabooyinka xakamaynta caabuqa habboon ee warshadda.
- Tarmada kooxaha ciyaarta gudbbada cagta heekra sare ah waxaa la oggolaan doonaa laga bilaabo 16 Juun, marka laga reebo Sharciga COVID-19.